

# MAAMULKA GURIYEYNTA EE DEGMADA SAN DIEGO

3989 Ruffin Road, San Diego, CA 92123-1815 Taleefoonka: (858) 694-4801 Wicitaan acag La'aan: (877) 478-5478 Fakis: (858) 467-9713 TDD: (800) 735-2929

## Kulanka Guddiga La-talinta Deganeyaasha

Maamulka Guriyeynta ee Degmada San Diego (HACSD) waxay noqon doontaa marti-gelinta Kulanka Guddiga La-talinta Deganeyaasha (RAB) **Khamiista, Meey 23, 2024**, laga bilaabo 10 subaxnimo-11:30 subaxnimo dhismaha Adeegyada Horumarinta Bulshada iyo Guryaha ee ku yaal 3989 Ruffin. Road, San Diego, CA., 92123. Ajandaha waxaa ku jiri doona dib u eegis qabyo qoraalka 2024/2025 dulmarka guud ee miisaaniyad sanadeedka 2024/2025, Qorshaha Wakaalada Shanta Sano ee soo socda, iyo wixii cusbooneed ee barnaamijyada aan maamulno.

Deganeyaasha Guryeynta Dadweynaha iyo ka qaybgalayaasha Housing Choice Voucher (HCV) waxaa lagu dhiirigelinayaa inay ka soo qaybgalaan shirarka si ay fikrado uga dhiibtaan habka faallooyinka. Imaanshaha waa ikhtiyaar mana aha Guriyeynta Dadweynaha ama shuruudaha barnaamijka HCV. Xubnaha codbixinta ee RAB ayaa soo gudbin doona faallooyin iyagoo ka wakiil ah dadka deegaanka iyo ka qaybgalayaasha. Fadhiga qolka shirarka waa xaddidan yahay.

## Guryaha iyo Adeegyada Horumarinta Bulshada Qolka Shirarka Sycamore

3989 Ruffin Road  
San Diego, CA 92123

**Marka:** Khamiis, Meey 23, 2024

**Waqtiga:** 10 subaxnimo - 11: 30 subaxnimo

Ajendaha kulanka iyo daqiiqadaha ayaa laga heli karaa bogga [Guddiga La-talinta Deganeyaasha](#).

Turjumaada luqadaha kale, oo ay ku jiraan Luqadda Calaamadaha Ameerika, waa in la codsadaa 72 saacadood ka hor kulanka. Fadlan u soo gudbi codsigaaga tarjumaada luqadda ama hoyga kale Vana Nguyen (858) 694-8759 ama iimayl u dir [ngocvan.nguyen@sdcounty.ca.gov](mailto:ngocvan.nguyen@sdcounty.ca.gov).

